Dhexdhexaadiye Sharciyeed

Gargaar diyaar la ah

Waxa aad samayn karto haddii aad cabasho qabto

Dhexdhexaadiyaha Sharciyeed (Legal Ombudsman) waxa uu kaa caawin karaa in aad xalliso cabashada aad ka qabto adeegyada sharciyeed

- Miyaadan ku faraxsanayn adeegga aad ka heshay looyarkaaga ama shirkadda looyarkaaga?
- Miyaad u aragtaa in looyarkaagu uu qaban waayey wixii uu ku heshiiyey in uu qabto, in uu si caga jiid ah uga soo jawaabay wicista aad u dirtay, ama uu kordhiyey lacagaha uu kaa qaado isaga oo aan si fiican taas adiga kuugu macnayn?
- Miyaad iyaga taas u sheegtay oo miyaadan weli ka helin jawaab aad ku qanci karto?

Buugyarahani waxa uu ku siinayaa warbixin ku saabsan Dhexdhexaadiyaha Sharciyeed iyo adeegyada aan annagu ku deeqno. Waxa uu ka hadlayaa nooca cabashooyinka ee aan annagu wax ka qaban karno iyo dadka iyo ururrada aan caawin karno. Waxaa weliba ku jira hage tartiib-tartiib ah oo kaa caawinaya in aad fahanto sida adeeggu u shaqeeyo.

Waxa aan nahay urur madaxbannaan oo awood rasmi ah u leh in uu xalliyo cabashooyinka ku saabsan adeegyada sharciyeed. Wax eexasho ah annagu ma lihin haba yaraatee oo cidba ma taageerno. Marka aan cabasho helno, waxa aan fiirinnaa dhammaan qodobbada cabashada ku jira si aan u gaari karno natiijo caddaali u ah dhammaan dadka arrinka ku lug leh. Haddii aan ku go'aan gaarno in adeegga aad heshay uu ahaa mid aanan lagu qanci karin, waxa aan hubin karnaa in looyarkaaga ama shirkaadda looyarkaagu ay kaas saxaan.

Adeeggayagu macaamiisha waa u bilaash.

LEGAL OMBUDSMAN

Waa maxay arrimaha aan xallintooda gargaar ka bixin karno?

Waxa aan ku lug yeelan karnaa cabashooyin noocyo farabadan oo kaladuwan ah oo ku saabsan adeegga sharciyeed, sida habka looyarku wax uga qabtay dardaaran ama arrin qoyska khuseeya. Waxa aan weliba gargaar ku siin karnaa haddii aad adeeg liita heshay markii aad aqal iibsatay ama iibisay ama aad dalbatay magdhawga dhaawaca jirka gaaray.

Waxa aan baari karnaa cabashooyinka ku saabsan noocyo looyar oo farabadan: looyarrada caadi ah, qareennada maxkamadda, kalawareejiyeyaasha milkiyadda ee shati leh, looyarrada kharashka, amarfuliyeyaasha sharci ah, hubiyeyaasha heshiisyada, looyarrada batantaha, looyarrada calaamadaha shirkadaha, shirkadaha looyarrada iyo shirkadaha ku deeqa adeegyada sharciyeed.

Si aad u ogaato haddii aan ku caawin karno, fadlan annaga nala soo xiriir. Macluumaadkayaga xiriirka waxa aad ka heli doontaa dhabarka buugyarahan.

Yaa isticmaali kara adeeggayaga?

Adeeggayagu waxa uu u furan yahay dhammaan shacabka dalka iyo ganacsiyada, hay'adaha samafalka, naadiyada iyo ururrada ammaano-hayn ee aad u yar yar.

Waxa aan annagu ka jecel nahay in aad laftigaagu toos noola soo xiriirto, laakiin qof aad saaxiibbo tihiin, qoyskaaga ka mid ah ama qof kale ayaad weydiisan kartaa in uu nala soo xiriiro isaga oo magacaaga ku hadlaya. Haddii aad go'aansato in aad qof lacag siiso si uu wakiil kuugu noqdo, sida shirkad maamul lacag magdhaw, adiga ayaa kharashkooda bixin doona.
Si aad u fiiriso haddii aan ku caawin karno, fadlan na soo wac.

Maxaa dhacaya haddii aanan ku caawin karin?

Haddii annagu aanan ku caawin karin, waxa aan kula xiriirin karnaa ururro kale oo baaritaan ku samayn kara waxyaabaha uu ka mid yahay habdhaqanka xun ee xirfadeed. Masuuliyiinta Nidaaminta Looyarrada (Solicitors Regulation Authority) iyo Guddiga Xeerasha Looyarnimada (Bar Standards Board), tusaale ahaan, ayaa wax ka qaban kara arrimaha annagu aanan awood u lahayn in aan baarno.

Waa kuwan tallaabooyinka aad u baahan tahay in aad qaaddo

Tallaabada 1: Looyarkaaga u sheeg

Waxa aad xaq u leedahay in aad looyarkaaga ka filato adeeg heerka ugu sarreeya ah iyo caddaalad. Laakiin mararka qaar qaladaad ayaa iman kara.

Haddii aadan ku faraxsanayn adeegga aad heshay, looyarkaaga u sheeg si uu isagu fursad ugu helo in uu qaladaadka yimaadda laftigiisu saxo. Looyar kaste waa in uu kuu macneeyo sida uu u shaqeeyo nidaamka waxkaqabashada cabashooyinka ee shirkaddiisa u gaar ah. Markaa isaga taas horta ka warayso.

Waa in aad looyarkaaga fursad u siiso in uu xalliyo cabashadaada ka hor inta uusan arrinka soo faragalin Dhexdhexaadiyaha Sharciyeed. Cabashadaada isaga u dir islamarka aad garato in ay dhibaato jirto – waqti badan ha la raagin.

Haddii aad dhibaato kala kulanto la xiriiridda looyarkaaga oo aadan hubin waxa xiga ee aad samayn karto, fadlan annaga nala soo xiriir.

Tallaabada 2: Looyarkaaga waqti u sii in uu qaladaadka yimaadda xalliyo

Waa in aad looyarkaaga u oggolaato ilaa siddeed toddobaad si uu cabashadaada u xalliyo. Haddii siddeed toddobaad ka dib uusan isagu cabashadaada wax uga qaban si aad ku qanci karto, waxa aad arrinka soo dhexgalin kartaa Dhexdhexaadiyaha Sharciyeed.

Tallaabada 3: Cabashadaada u soo dir Dhexdhexaadiyaha Sharciyeed

Waa in aad annaga noo timaaddo islamarka suurogal kuu ah ka dib marka aad isku daydo in aad dhanka looyarkaaga horta ka xalliso dhibaatada jirta. Haddii aadan ku faraxsanayn jawaabta gabagabada ah ee aad ka hesho, waxa aad haysataa muddo ugu badnaan 6 bilood ah si aad cabashadaada annaga noogu soo dirto. Sidoo kale waa in aadan cabashadaada annaga noo soo dirin taariikh dhaafsan muddada 12 bilood ah ee ka dambaysa goortii ugu horraysay ee ay dhibaatadu dhacday, ama goortii macquul ahayd in aad garato in ay dhibaato jirto.

Marka aad annaga nala soo xiriirto waxa aan adiga iyo looyarkaaga idiinka baahan doonnaa in aad bixisaan macluumaadka ku saabsan tallaabooyinka aad qaaddeen si aad cabashada u xallisaan ka hor inta aanay iyadu na soo gaarin. Nuqullo ka hayso wixii waraaqo ah ee aad isku dirteen iyo weliba wixii qoraal ah ee aad ka samaysay waxa dhacay iyo goorta ay dhaceen.

Marka aad annaga nala soo xiriirto, waxa aad nagu caawin doontaa haddii aad hayso:

- magaca iyo cinwaanka looyarka ama shirkadda looyarrada ee ay cabashadu ku saabsan tahay
- taariikhdii ugu horraysay ee aad iyaga ka wargelisay cabashadaada
- taariikhdii ugu horraysay ee aad ogaatay in ay jirto dhibaatada aad iyaga cabasho uga dirtay
- faahfaahinta ku saabsan jawaabta aad iyaga ka heshay.

Tallaabada annagu aan qaadi karno

Haddii annagu aan oggolaanno in adeegga looyarkaagu uu ahaa mid aanan lagu qanci karin, waxa aan isaga weydiin karnaa in uu:

- adiga kuu cududaarto
- kuu soo celiyo wixii dukumeenti ah ee aad u baahan karto
- hawl dheeraad ah adiga kuu qabto haddii ay taasi saxi karto qaladka yimid
- kuu soo celiyo ama kaa yareeyo ujrooyinka sharciyeed, ama
- ku siiyo magdhaw haddii uu khasaare ku gaaray ama si xun laguula dhaqmay (waxa ay taasi gaari kartaa ilaa £30,000).

Cabashooyinka naloo soo diro intooda ugu badan waxaa loo xallin karaa si aan rasmi ahayn iyada oo dadka ku lug leh dhammaantood lagu dhiirrigeliyo in ay ku heshiiyaan waxa caddaali ah. Waxa aan annagu weliba qaban karnaa baaritaanno rasmi ah haddii loo baahdo. Laakiin waxa ay kuwaasi qaadan karaan waqti dheeraad ah si loo dhammaystiro.

Marka la aqbalo, go’aanka Dhexdhexaadiyuhu waa midka ugu dambeeya.

Sida aad noola soo xiriiri karto

Na soo wac
Waxa aad naga soo wici kartaa lambarka **0300 555 0333**
(Wicista loo soo diro Dhexdhexaadiyaha Sharciyeed waxaa laga bixiyaa isla sicirka lambarka guriga ee caadi ah ee 01 ama 02, xataa marka laga soo diro telefoonka gacanta, waana la duubaa si loogu tababbarto iyo si loo ilaaliyo).

Waxa aan furan nahay Isniinta ilaa Jimcaha inta u dhexeysa 8.30 subaxnimo iyo 5.30 galabnimo.

Haddii aad naga soo wacayso dalka dibaddiisa, fadlan soo wac lambarka +44 121 245 3050.

Haddii aad rabto nidaamkayaga minikom soo wac lambarka 0300 555 1777.

Email noo soo dir
Waxa aad weliba email noogu soo diri kartaa halkan
enquiries@legalombudsman.org.uk

Haddii aad rabto in aad war dheeraad ah ka hesho cidda aan nahay iyo waxa aan qabanno, fadlan booqo
www.legalombudsman.org.uk

Warqad noo soo qor
Haddii aad ka jeceshahay, waxa aad warqad noogu soo diri kartaa halkan
Legal Ombudsman
PO Box 6806
Wolverhampton
WV1 9WJ

Haddii aad u baahan tahay in aad warbixinta ku hesho luqad kale ama far waaweyn, farta Braille ee dadka indhaha la’ ama cajal dhegeysi ah, fadlan nala soo xiriir.

LEGAL OMBUDSMAN